Erayga iyo Maanta Somtwt 0259

ADADAYGGA

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **ADADAYGGA.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **ADADAYGGA** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu dhegaysnno qasiiddadan.

SONG: ADIGAA NOO GARGAAR.

Wakhti ka wakhti ayaannu haddaan nahay ururka loo yaqaanno Erayga iyo Maanta ka hadalnaa wax ku saabsan doorka ragga iyo dumarka iyo sida aynu u macaamilayno marba haddaan nahay masiixiyiin. Maanta waxaannu doonaynaa inaan qadar ka yara hadalno waxa ku saabsan aabayaasha. Xaqiiqatan Aabbe waa inuu leeyahay mabda', kuna adkaysto mabaadiisiisa, oo uu ku joogo shuruucda uu dhigto.

Welibana aabbe wuxuu u baahan yahay oo kale, inuu ilmihiisa tuso ama u muujiyo dabacsanaan markay joogto xaaladaha aan khusaynin rumaysdka iyo damiirka, laakiin xaaladaha kale wuxuu ku shaqaynayaa ishaa-falataysi. Bal waxaannu yara eegaynaa dhacdo ku qoran kitaabka Falimaha Rasuullada cutubka 10aad halkaasoo looga hadlayo laba shakhsi oo xoog lahaa.

Mid kastana si adag buu ugu dhegganaa wacyigiisa ama dareenkiisa, laakiin waxaa isku keenay Ilaah oo baray inay isbeddelaan waayo Ilaah baa sidaas ku hoggaamiyey iyaga. Kitaabka Falimaha Rasuullada 10 ayaa waxaa ku qoran ninka la

yiraahdo Korneliyos oo ahaa taliye reer Rooma ah oo hoggaamiya boqol askari. Waxaa loo sheegay inuu raadiyo rasuul Butros. Haatan, rasuul Butros wuxuu ahaa nin xoog leh, oo ahaa kalluumaysato. Wuxuuna ahaa xerta Ciise Masiix, oo waxaan garanaynaa in Butros uu ku adkaa waxa uu aaminsan yahay ama wacyigiisa. Labadan nin ayaa inta jooga kuwaasoo kulmi doona, wuxuuna labadan Ilaah barayaa wax cusub oo ay tahay inay sameeyaan si fikirkooda iyo wadcigooduba isku beddelo.

Korneliyos wuxuu soo booqday Butros, Butrosna wuxuu riyo ku arkay in Ilaah ka doonayo inuu furfurnaan u muujiyo dadka aan Yuhuudda ahayn oo uu aqbalo oo ay xaq u leeyihiin inay xubno ka noqdaan Kiniisadda Masiixa. Ilaah wuxuu sidan ku suuragaliyey kaddib markii uu muuqaal riyo ah tusay Butros kaasoo uu ku arkay xayawaanka oo dhan oo samada ka soo degaya oo ay la socdaan kuwa aan daahirka ahayn.

Markaasaa samada waxaa uu ka maqlay cod leh: **"Butrosow kac, gowrac oo cun."** Butrosna cod dheer buu ku jawaabay oo yiri, **"maya Sayidow".** Muxuu sidaas u yiri? Wuxuu u yiri waxay ahayd in Yuhuudda ay mamnuuc ka ahayd inay u dhowaadaan xayawaanka aan daahirka ahayn ama cunaan. Markii taasu dhacday kaddib, ayaa waxaa booqasho ku yimid Korneliyos.

Markaasaa Butros gartay in muuqaalka uusan ka dhignayn xayawaanka aan daahirka ahayn oo keliya, laakiin uu khuseeyey dadka ama quruumaha aan Yuhuudda ahayn oo Yuhuuddu aaminsanayd inaanay dad nadiif ah ahayn iyo sida Ilaah haatan ugu sheegayo in dadkaasi markii hore loo arki jiray karaahiyo inay qayb ka ahaadaan boqortooyada Ilaah, iyadoo la soo marayo Ciise Masiix.

Rasuul Butros wuxuu beddelay fikir uu horey u aaminsanaa, wuxuuna noqday qof dabacsan. Wuxuuse ku dhegganaa akhlaaqdiisa suuban, laakiin Ilaah wuxuu haatan u muujinayaa sheey cusub waxayna ahayd inuu qaato aragti ama fikir cusub oo kii hore ka duwan. Markarka qaarkood way adag tahay in odayashu ay go'aan ka gaaraan waxyaalaha aan laga tanaasuli karin, iyo waxyaalaha loo dabci karo.

Waxaan xusuustaa markii aan soo koraayey ee ilmaha aan ahaa in aabbhay oo wadaad ahaa, oo wacdiye ka ahaa hay'adda Erayga iyo maanta, uu cunnooyinka qaar iyo miyuusikada qaar uu go'aan adaga ka qaadan jiray. Mararka qaarkood wuxuu kuu sheegayaa waxa wanaagsan, sida cunnada qaar kuwaas oo uusan waxba ka qabin, qaar kalena uusan jeclayn.

Miyuusikadana waa la mid qaarna wuu jeclaa, qaarna uu nebcaa. Sidaas ayaa dhaqankiisu ahaa, adigana laga yaabo inaad sidaa oo kale tahay. Waxaad amar ku bixisaa waxa ay tahay inay cunaan reerkaaga iyo waxa ay tahay inay ka fogaadaan, iyo waxa ay tahay inay daawadaan ama dhegaystaan iyo waxa ay tahay inay ka fogaadaan. Sidaas ayuu ahaa aabbahayna, laakiin welibana waxaan og nahay in go'aamadaasu yihiin kuwo shakhsiyadeed laakiin aanay caam ahayn.

Waxaa markaas jira waxyaabo aan lagu gorgortamin oo hubaal ah ama xaqiiqo ah, waana kuwo daa'iman aadan ka gorgortamaynin, amaadan ka muujinaynin dabacsanaan. Mid ka mid ah waxyaalaha aabbayaasha maanta ay ku adkaysanayaan ayaa waxay tahay in Hadalka Ilaah run yahay oo da'im yahay, oo haddii aabbe doonayo inuu Hadallada Ilaah ku adkaysto, waxaa ka hor imanaya dhaqan si degdeg ah isku beddelaya oo ka jira dunida, waxaana halku dheg u ah erayga (Inclusivity)ama soo dhowaynta ama wax kasta la qaadanayo fikir

ahaan oo aan la diidayn ama aan la nacaynin. Fikirkaas ama mid kastoo kale noocuu doonaba ha ahaadee, waa lawada rumaysan yahay, waxaana wada aaminsan bulshaweynta dunida, mid la diidi karana maahan. Qof waliba waa inuu door ka ciyaaro qaadashada ra'yigaas; qof walibana waxaa ku waajib ah inuu ogaado inay u wanaagsan tahay tahay qaadashada ra'yigaas noloshiisa iyo in kale.

Xaqiiqatan waxaa jira arrin aanay qaadan karin masiixiyiinta, waana galmada ilduufka, ama guurka jinsiga isku midka ah, isticmaalka daroogada iyo dabeecadaha kharriban, iyo miyuusikada akhlaaq xumida leh. Waxyaalahaas wax la aqbali karo maahan, ama wax ay yeeli karaan masiixyiinta, micnana ma leh haddii dhaqamadu soo dhoweeyaan iyo haddii kale.

Markay halkaas joogtana Aabbaha masiixiga ah waa inuu iska fogeeyo oo diido qaadashada ra'yiyadaas khaldan sida guurka jinsiga isku nooca ah. Waxaa rasuul Butros leeyahay, anigu ka qayb qaatan maayo sheey ka hor imanaya doonista Ilaah. Tanina waa waxaa Aabbaha ay tahay inuu u sameeyo carruurtisa. Waa inuu tuso inaanu marnaba yeelaynin ama u dabcin damaca dhaqamada si kastaba.

Welibana, mararka qaar, waxaan u baahanahay markaan ilmaha barayno daacadnimada dabiicadaha adadayga, waxaan u baahan nahay inaan muujino dabacsanaan. Khaasatan markay joogto dugsiga aan gaynayno ama miyuusikada loo isticmaalayo cibaadaysiga. Waa inaan ogaanno haddii boqortooyada Ilaah ay faa'iido ugu jirto taas iyo in kale. Inkastoo aynaan innagu jeclaysan, haddana waa inaan oggolaanno haddii ay doonayaan. Markay joogto raashinka waxaa jira cunno aynaan jeclayn iyo mid aynu jecel nahay, markaa waxyaalahaas oo kale waa inaan la mayal

adkaan. Caruurta waa in adadayg loo muujiyaa marka ay joogto su’aalaha khuseeya damiirka, laakiin markii ay tahay wax ay kala xulanayaan oo la xiriira cunno iyo wixii la mid ah ama dhar xirashada qaar, waa inaan dabacsanaan muujinaa sida laynagu farayo Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka Rooma 14:16, markaasoo rasuulku uu lahaa:**“Haddaba, wanaaggiinna yaan la caayin.”**
Marka rasuulku uu sidaa lahaa waxaa taagnayd marxalad shakhsiyaadka qaar ay dadka ku eedaynayeen cunooyinka qaarkood oo ay cunaan. Waxaa taa la mid ah hadalkii rasuul Butros markaasoo uu lahaa, Anigu cuni maayo cunno aan nadiif ahayn haddaanay taasu keenaynin fursad kuwo badan oo qruumaha ay ku soo hanuunaan oo Masiixa ugu yimaadaan.
Wuxuu ula jeedaa marba haddaan iyaga la joogo oo wacdinayo, oo ay hadalka aqbalayaan oo Masiixa u imanayaan wixii ay cunaan waan la cunayaa waayo iyagaba isbeddel baa ku socda. Isla sidaas oo kale, markii qofka Masiixiga ah uu bilaabo furfurnaan oo dadka wax la cuno, ayaa waxaa jira kuwo ay ku adag tahay inay cunto kasta cunaan, markaasay dadka kale ku leeyihiin, Maahan inaad cunnada iyo cunadaas aad cuntaan.
Waa wax ku saabsan dhaqan, laakiin rasuulku wuxuu adkaynayaa dhaqanka cusub ama hanuunka qofka soo raaca Masiixa. Micna ma leh sidii uu ahaan jiray, laakiin sida uu noqon doono ayaa muhiim u ah.
Rasuul Bawlos ayaa markaas isna leh, Qofnaba ha ka rumaysanina in waxa aad samaynaysaan ay khaldan yihiin haddii kaskiinnu idiin fasoxo Ilaah hortii. Haddii waxaasi uusan ILaah nacladin, xor baad u tihiin inaad yeeshaan waxaas maankiinna ku jira oo ku dhaqantaan.
Haddaba, dhaqan ahaan aan raacno hadalka rasuul Bawlos sida ku qoran Warqaddiisii reer Rooma

14:16, markaasoo uu lahaa: "**Haddaba, wanaaggiinna yaan la caayin.**" Waxay taasina tibaaxaysaa inaan qaadano go'aan suubban haddaan nahay aabayaasha. Hadii aynu dareenno in waxyaalaha qaar ay cibaaddarro tahay, Oo ka hor imaadsan yihiin qorniinka, waa inaan ilmaha barnaa in waxaasu ay yihiin wax aan hagaagsanayn. Uma wanaagsana dadka samaynaya, oo bulshadana uma wanaagsana. Dhaqan ahaan dadku way aqbali karaan, oo qaarkeen baa soo dhawayn kara inkastoo aynaan la mid ahayn shakhsiyaadka samaynaya arrinka. Aan wax kuu sheego! Kitaabku wax weyn uma arko fikirka loo wada badan yahay ama dhaqamada dadku isku bahaystaan haddaanay waafaqsanayn akhlaaqda suubban.

Waxaa jira akhlaaq toosan iyo akhlaq shar ah. Waxaana jira ficillo xaq ah iyo kuwo xaqdarro ah. Baybalkana wuxuu ficillada dadka ku sifeeyaa sida ay yihiin, diiradda ma saaro inay sharka dhowaystaan oo keliya, wuxuuse eegaa dabiicadaha dadka oo dhan iyo wax kasta oo ay jecel yihiin Aadanaha iyo akhlaaqdooda, xumaan iyo samaan. Tan Baybalka uu diiradda saaro waxaa weeye in dadku ay maqlaan Injiilka Ciise Masiix, wuxuuna soo dhoweeyaa kuwa saarta rumaysadkooda Ciise Masiix oo isaga u yimaada.

Marka ay timaaddo xukunka dabiicadaha, kitaabka Qoduuska ah waa cad yahay, oo aabayaasha waxaa laga doonayaa inay u kala caddahay waxa quman iyo waxa khaldan, iyo xaqa iyo xaqdarrada. Ilmaheenna waa inaan taas barnaa. Markay joogto kala xulashada, waa inaan dabacsanaan muujinno, sida midabka sawirrada sharaxaadda, ama codadka miyuusikada, waxyaalahaas oo kale maahan inaan meel ku dhagno, oo mar waliba taladeena la qaato.

Laakiin markay joogto Hadallada Ilaah, waa inaan leenahay go'aan aan laga tanaasulin ama aan lagu

gorgortamin. Waxaan u baahan nahay inaan go’aan ka qaadanno markay joogto xaqa iyo xaqdarrada, waxa qumman iyo waxa khaldan. Ilaah wuxuu na siiyey xigmad markaannu odayaal nahay si aan ilmaha u tusno inay damiir adag lahaadaan. Balse markay joogto waxyaabaha shakhsiga ah ee la kala dooranayo waa in loo yeelo qofba waxa la hagaagsan, markayse joogto Hadallada Ilaah, waa inay lahaadaan go’aamo adag si ayan uga beyrin hadalka qoran.

SONG: ADIGAA NOO GARGAARA

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.